# Jadwalka tallaalka carruurnimada ayaa is-bedelaya

**Gudiga wadajirka ah ee talaalka iyo badbaadinta (JCVI) waa koox khubaro ah oo ku takhasusay guud ahaan UK, kuwaasoo ka caawiya go'aaminta go'aan ka gaarista tallaalka carruurta ay tahay inay helaan iyo goorta ay tahay inay qaataan. Waxay ku talisay in wax laga bedelo jadwalkii tallaalka carruurnimada ee laga dhaqan galin doono Waqooyiga Ireland.**

Shaxda bogga ku xiga waxa ay muujinaysaa isbedelada. Jadwalka cusub ee tallaalku wuxuu ilmahaaga siin doonaa  difaac ka wanaagsan kii hore oo ka hortagaya cudurrada halista ah.


- Isbedelka ugu horreeya waxa uu bilaaban doonaa 1da July 2025. Muddada laba tallaal oo la bixiyay jadwalka tallaalka ee hadda la joogo ayaa is bedelaysa. Meningococcal B (MenB) ee la ssiyo toddobaadka 16 aya hore loogu soo dhigi doonaa toddobaadyada 12. Talaalka pneumococcal (PCV) waxaa la siin doonaa todobaad 16 gudihiisa.
- Ka ilaalinta meningococcal C (MenC) looma baahna 12 bilood sababo la xiriira qaadashada wanaagsan ee barnaamijka loogu talo galay tallaalka dhallinyarada. Talaalkan oo la bixiyo 12-ka bilood, kaas oo lagaga difaaco haemophilus Influenzae b (Hib), waxaa loo dhaqaajin doonaa ballan cusub oo ah 18 bilood.
- Laga bilaabo Janaayo 2026, talaalka labaad ee talaalka jadeecada, qanjidh -xanuunka (QAAMO-qashiirka iyo rubellaha) ayaa loo gudbiyaa balan cusub oo ah 18 bilood gudahood, taas oo ka dhigaysa in ilmahaaga wakhti hore la difaaco.
- In cunuggaadu uu isbedelku saameeyey, wuxuu ku xiran yahay hadba taariikhda uu dhasho.
- Waxaa laguu sii wadi doonaa in laguu waco dhammaan waqtiga loo qabto tallaalka ilmahaaga, markii la gaadho waqtiga laguu qabtay.
- Buug-yaraha macluumaadka cusub waxaa la soo saari doonaa Janaayo 2026 - haddii aad u baahan tahay macluumaad taariikhda ka hor arrintan, fadlan ka hubi khadka tooska ah adoo raacaya QR code ama link: www.nidirect.gov.uk/articles/childhood-immunisation

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan isbeddelada jadwalka tallaalka, fadlan la hadal soo booqdaha caafimaadka ilmahaaga, kalkaalisada qoyskaaga ama GP.ga. Waa muhiim in ilmahaaga aad keento tallaal waqtiga loo qabtay si ay uga caawiyaan caafimaadkooda oo ay ka ilaaliso cudurada halista ah.

**Xasuusnow, tallaalku waa amaan, waxtarna wuu leeyahay wuxuuna badbaadin karaa nolol**

06/25Som

# Shaxdani waxay muujinaysaa jadwalkii tallaalka carruurnimada ee hadda jira oo ah 2025 iyo 2026 isbeddello la iftiimiyey




HSC Public Health Agency

www.publichealth.hscni.net